



Ilaali caafimaadka qoyskaaga - iyo maalgalintaada

Ma iibsanaysaa guri leh ceel ama durdur? Ilaha biyaha gaarka ah waxa ku jiri kara walxo khatar badan oo heerarkoodu sarreeyo oo keeni kara saamayn caafimaad iyo jirro. Waa fiican inaad ogaato waxa biyaha ku jira maadaama ay qoyskaagu cabbi doonaan kahor inta aadan guriga aad rabto iibsan. Waa kan waxa ay tahay inaad samayso si aad biyaha u tijaabiso

Ahaw guri-gate caqli badan

Biyo nadiif ah oo badbaado leh waxay ilaaliyaan caafimaadka qoyskaaga iyo maalgalintaada. Waa jira tallaabooyin badan oo la qaado marka guri la iibsanayo, laakiin tijaabinta biyaha – oo ku kacaysa \$159 – waa arrin fudud. Waa muunado ka qaadi kartaa qasabadda adigu ama waxaad waydiisan kartaa baaraha guriga inuu ka qaado. Ka daawo fiidyowgeena ku saabsan sida loo tijaabinayo biyahaaga barta HealthVermont.gov/water (Ingiriisi ku qoran).



Waxa biyaha laga tijaabinayo

Ka tijaabinta faddareeyayaasha caamka ah iyadoo la isticmaalayo **Xirmada Tijaabinta Mulkiilaha Guriga Vermont** oo laga keeno Shaybaarka Waaxda Caafimaadka. Tan waxa ka mid ah tijaabooyinka:

- Bakteeriya
- Kiimikooyinka aan orgaaniga ahayn
- Shucaaca gross alpha

Sidoo kale waxa dhici karta inaad rabto inaad hawada ka tijaabiso radon. Booqo HealthVermont.gov/radon (Ingiriisi ku qoran) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



Halka laga helo tijaabada biyaha

Isticmaal shaybaar biyaha la cabbo qaabilسان oo muctarif ah. Waa dalban kartaa agabka tijaabada Shaybaarka Waaxda Caafimaadka 800-660-9997 ama 802-338-4724 ama isticmaal shaybaar biyaha la cabbo qaabilسان oo muctarif ah oo kale. Si aad u hesho liiska shaybaadhada muctarifka ah, booqo HealthVermont.gov/lab/lab-testing/drinking-water-testing#altnlab (Ingiriisi ku qoran).



Waxaad samaynayo kadib tijaabada

Natijjooyinka tijaabodu waxay kuu sheegi doonaan haddii faddareeyayaashan caamka ah ay biyahaaga ku jiraan iyo siday u saamayn karaan qasabadaaha iyo qalabka biyaha muddo kadib.



Haddaad su'aalo ka qabto natijjooyinkaaga iyo tallaabooyinka xiga, booqo HealthVermont.gov/water-a-z (Ingiriisi ku qoran). Sidoo kale waxaad talo ka heli kartaa khubarada tayada biyaha ee Waaxda Caafimaadka. Wac 802-489-7339 ama iimeyl u dir AHS.VDHDrinkingWaterProgram@vermont.gov.



Tijaabinta Biyaha Ceelka: Hagaha Gataha Guriga

Diisambar 2023

Wax badan ka ogow halkan HealthVermont.gov/water (Ingiriisi ku qoran)